

Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Markii Ilaah Sameeyay
Waxkasta



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus

Waxa dhaqan-geliyay: Bob Davies; Tammy S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service

email: zemendale@gmail.com

Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children

www.M1914.org

©2013 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Yaa ina abuuray? Kitaabka
Quduuska ah, Ereyga Ilaah, wuxuu
sheegayaa sidii uu kusoo
bilaabmay cirqiga
aadanuhu.



Wakhti fog hortiiis, Ilaah wuxuu
abuurray ninkii ugu horreeyay
waxaanu u bixiyay
Aadan.




Ilaah wuxuu Aadan ka sameeyay
ciidda dhulka. Markii Ilaah uu
Aadan ku afuufay nafta,
Aadan wuu
noolaaday.




Waxaanu is arkay isagoo dhex jooga
beer qurxoon oo la yidhaahdo
Ceeden.



Ka hor intii Ilaah aanu abuurin
Aadan, waxa uu sameeyay duni qurux
badan oo ay ka buuxaan waxyaalo
yaab badani.



Tallaaboba tallaabo kaddib, Ilaah
wuxuu sameeyay meelo taag ah iyo
meel ban ah, ubaxyo udgoon iyo dhir
dhaadheer, ...




... shimbiraha baalasha leh iyo shinni
dananaysa, kalluunka badda ku jira
iyo xammaaratada. Xaqiiqadii, Ilaah
wuxuu abuuray waxkasta oo


waxkastaana
way jiraan.



Bilowgii, ka hor intii
Ilaah aanu waxba
abuurin, Ilaah oo
keliya ayaa
jiray. May
jirin dad
iyo meel iyo
waxkale toona.
Waxba may jirin.



Muu jirin iftiin iyo
mugdi toona. Meel
hoose iyo meel
sare toona
may jirin.
May jirin
shalay
iyo berry
midkoodna.



Waxa jiray oo
keliya Ilaah oo
aan lahayn
bar bilow.
Dabeetana
Ilaah fal ayuu
sameeyay.




Bilowgii Ilaah samada iyo
dhulkuu abuuray.



Dhulkuna qaab ma
lahayn, wuuna
madhnaa;
gudcurna
moolkuu

dul
joogay.



Dabadeed Ilaah
wuxuu yidhi.
"Iftiin ha
ahaado."



Iftiin baana ahaaday. Ilaahna
iftiinkii wuxuu u bixiyey Maalin,
gudcurkiina wuxuu u bixiyey Habeen.
Waxaana jiray fiid iyo subax, isla
maalin ah.



Maalintii labaad, Ilaah wuxuu isu keenay biyay badaha waaweyn, badaha yaryar, iyo harooyinka iyagoo ka hooseeya Samada.

Maalintii saddexaad, Ilaah wuxuu yidhi, "ciidda engegani ha muuqato," sidaasayna ahaatay.



Ilaah sidoo kale wuxuu amray inuu
dhulku soo saaro dhir
waaweyn iyo kuwo
yaryar iyo doog



iyo ubaxyo.





Sidaasayna ahaatay. Waxaana
jira-fiid iyo subax,
maalintii
saddexaad.



Dabeeto Ilaah wuxuu sameeyay
cadceedda, iyo dayaxa,
iyo xiddigo badan oo
aanay cidi tiring karin.



Oo waxaana jiray
fiid iyo subax,
maalintii afraad.



Xayaawaanka
badda ku jira
iyo kalluunka
iyo shimbiruhu
waxay ahaayeen
kuwii xigay ee
Ilaah samaynayay.



Maalintii
shanaad Ilaah
wuxuu sameeyay
kalluunka
waaweyn iyo
kuwa yaryar,
shimbiraha lugaha
dhaadheer sida
gorayada iyo
shimbiraha yaryar.



Ilaah wuxuu
sameeyay nooc
kastoo kalluun
ah si ay u
buuxiyaan
biyaha
dhulka, ...




... waxa
kaluu sameeyay
shimbiraha nooc
kasta si ay uugu
raaxaystaan
dhulka iyo badda
iyo cirkaba.




Intaas kaddib, Ilaah markale wuxuu yidhi, "Dhulku ha soo bixiyo uun nool oo caynkiisa dhala, ..." Nooc kasta oo xayawaan iyo cayayaan iyo xamaarato ah ayaa dabeetana samaysmay.




Waxa jiray oo samaysmay
maroodiyaal dhulka kaga gariirinaya
iyo dabaggaalayaal. Daayeerro iyo
yaxaasyo. Dirxiyada iyo cayayaanka
kale.



Geriga qoorta dheer iyo bisadaha
yaryar ayaa iyaguna abuurmay. Nooc
kasta oo xayawaan ahna waxa
sameeyay Ilaah maalintaas.



Oo waxaa jiray fiid
iyo subax maalintii
lixaad.



Ilaah maalintii lixaad wuxuu
sameeyay wax aad cajiib
u ah. Waxwaliba
hadda diyaar ayay
u ahaayeen ninka.
Waxa jiray cunto
ku taalla dhirta
iyo xayawaan
u adeegaya.



Ilaahna wuxuu yidhi, "Aan nin inoo
eg ka samayno araggeenna, oo iyagu
ha xukumeen kalluunka badda,

iyo haadda hawada,
iyo xoolaha, iyo
dhulka oo dhan,
iyo waxa dhulka
gurguurta
oo dhan."



Markaa Ilaah wuxuu
dadka ka abuuray
araggiisa, oo Ilaah
araggiisa ayuu isaga
ka abuuray.



Ilaah
wuxuu
Aadan
ku yidhi.
"Geed kasta
oo beerta ku
yaal wax baad
ka cuni kartaa.



laakiin geedka
aqoonta
wanaagga iyo,
xumaanta waa
inaanad waxba
ka cunin: waayo,
maalintii aad wax
ka cuntid hubaal waad
dhiman doontaa."




Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu yidhi,
"Ma wanaagsana in ninku
keligiis ahaado; waxaan
u samayn doonaa mid
caawisa oo ku
habboon."




Ilaahna dabeeto wuxuu
Aadan u keenay haadda
duusha iyo dugaagga oo
dhan. Oo wuxuu iyagii u
bixiyay magacyo.



Oo magac bixintaasna
waxa uu ku ahaa xariif.
Laakiin dugaagga oo
dhan iyo haadda oo dhan
kamuu helin wax caawiya
oo isaga ku habboon.



Ilaah wuxuu Aadan ku riday hurdo
dheer. Dabeetana intuu isagii
ka saaray feedh ka
mida feedhihiisa
ayaa waxa uu
ka sameeyay
naag.



Naagtan Ilaah uu
sameeyayna waxa ay
ahayd Iammaanaha
ku habboon Aadan.



Ilaah wax kasta wuxuu ku
sameeyay lix casho. Kaddibna
Ilaah wuxuu barakadeeyay
maalintii toddobaad
oo u wuxuu ka dhigay
maalin nasasho.



Beer Ceeden dhexdeeda, Aadan
iyo Xaawa oo naagtiisa ahaydi
waxay ku haysteen farxad
dhammaystiran iyagoo
addeecaya Ilaah.



Ilaah waxa uu ahaa
Rabbigooda, kan iyaga
waxkasta siiya iyo
saaxiibkood.



Markii Ilaah Sameeyay Waxkasta

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 1-2

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.



Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay,
sidan ku dheh Ilaah:

Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay
Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato
denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay.
Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si
aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin
maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu
caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo
ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo
maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

